

Ka Saarida Limfa Noodi “Lymph Node Removal”

Limfa waa walaxda ashyaada si dabiicad ah u sameeyo jirka. Dhacaanka cad oo jirka ku socdaalo si oo u sifeeyo. Limfa wuxuu ku socdaa miiraha loo yaqaano **limfa noodeska**. Limfa noodiska wuxuu siriq u digayaa walaxda ashyaada aan loo baahneen, iskuna dayaayo in oo ka saaro jirka sida unugyada kansarka, iyo fiiruska.

Limfa noodiska haweeynka waxay la xariiraan kansarka naaska. "**Noode-positive**" micnaheeda wuxuu yahay unugyada kansarka ayaa laga helay limfa noodiska.

"**Noode-negative**" micnaheeda wuxuu yahay unugyada kansarka Malaga helin limfa noodiska. Ogaashaha ama ogaasha la'aanta wuxuu cawinayaa dhakhtarkaada go'aanka ula dagaali lahaa kansarka kuuna siin lahaa daawo kugu haboon aad u baahan tahay.

Shaqada limfa noodka waa in oo qashinka ka miiro "waxa xun" sida unugyada kansarka. Saas dartee, noodka waa goobta lagu baaraayo unugyada kansarka ka baxsaday asalka burada iskuna dayaayo in oo u baxsado meela kale oo jirka ah. Kansarka laga helo limfaha noodeska waa in la saaraa si ay ugu korin nawaaxiga kale ee noodeska ama ku faafin meelaha kale jirka.




Image: National Cancer Institute

Biyobsiya “biopsy” Limfa Noode waa qaliin looga qaadaayo tusaale limfa noode si loo arko haddii oo jiro halkaas kansarka leeyahay. Limfa noodes waxaa laga saarayaa goobta gacanta hoosteeda oo u dhaw naaska. Dhakhtarka wuxuu limfa noodeska ku baarayaa weyneeyaha si oo u arko haddii oo leeyahay unugyada kansarka halkaas, halis badan kansarka loo malayaa.


Dhakhtarkaada inta badan wuxuu helayaa akhbaaro ku filan ka saarida limfa noodes. Takhtarka qaliinka wuxuu kaloo ka saarayaa noodes kastaba kansar u dareemo. Tirada faraha badan limfaha noodes waxay ku xiran tahay jirkaada iyo xirfada dhakhtarka qaliinta. Haweeyn kastaba waxay leedahay nambar limfaha kala jaad ah gacanta hoosteeda-si dabiici ahaan qaar ka mid ah haweeynka waxay leeyihiin shan, qaarka kalana in ka badan sodon.

Limfadeema “Lymphedema” waa ka bararka gacanta dhinaca naaska kansarka waxyeelayey. Limfadeema wuxuu ku dhacaa kaliyah 5–10%. Waxay khatarta u sareeysaa (25%) haweeynka leh limfa fara badan laga saaro lana isticmaalo raadiyeeshan goobta qaliinka iyo kimotarabiya ka dib. Heerka khatarta 25% ee limfadeema wuxuu kaloo quseeyaa haweeynka moodada duqa asalka mastektomi-oo laga saaray dhamaan limfaha noodes naaska ku wareegsan, intaa waxaa dheeraad ah ka saarida naaska iyo muruqyada hoos ku yaalo.

Ka saarida limfaha noodes lama dagaalaayo unugyada kansarka horay ugu faafay qaybaha kale jirka ama unugyada naaska ka baxay oo raacay xididada dhiiga. Sababahaas awgeed, waxaa aad u muhiim ah isla markaana cawinaayo in la qaato daawooyin kale oo dilaayo unugyada kansarka horay ugu baxsaday qaybaha kale jirka.

Ka Saarida Sentineel Limfa Noode "Sentinel Lymph Node Removal"

Sentineel limfa noode qaliin looga saaraayo qeybo yar limfa noodeska. Waa mid caadi ah oo hadda ah qaabka heerka. Sentineel noode biyobsiye waa akhtiyaar u fiican haweynka leh kansarka naaska heerka hore bilaawga ee ku lug leh khatarta dhxe ee limfa noode. Hase ahaateed, qaabkaan sentinel limfa noode kuma haboona haweynka limfa noodeska uusan caadi aheeyn ama la ogyahay in oo ku lug leeyahay kansarka.



© 2007 Terese Winslow
U.S. Govt. has certain rights

Qaamuuska wuxuu ku fashirayaa "sentinel (sentinel)" waa waardiyo, eeyga-waardiyaha, ama difaace. Sentinel limfa noodes waa noode koowaad "waardiyaha istaagan" ee naaskaada. Ka saarida sentineel limfa noode, dhakhtarka qaliinka wuxuu fiirinayaa limfa noode koowaad oo miiraayo dhacaanka dareeraha ka baxaayo goobaha naaska oo leh kansarka naaska.

© 2005 Terese Winslow, U.S.
Govt. has certain rights

Haddii kansarka unuga oo ka dilaacin burada kuna safrin naaska limfaha, Sentinel limfa noodes wuxuu u ekyahay limfaha noodes kale oo ka kooban kansarka.

Fikrada ka dambeeyso in laga saaro sentineel noodes waa sidaan: Ka saarista toban ama in ka badan limfa noodes si loo baaro dhamaantood in lagu arko kansarka, ka saarida qaybo yar noodes waxay u badan tahay in ay qabaano kansarka. Haddii noodaha uusan laheeyn kansarka, waxaa jira fursad noodaha kale in aysan laheeyn kansarka. Xaqiiqada, dhakhtarka qaliinka inta badan wuu ka saarayaa labo ama seddex noodes—sentineel noodes iyo dhamaan kuwa u dhaw.

Haweynka leh kansarka naaska oo yar (oona ka weyneen labo sentiimitir) iyo Limfa noodes loo dareemin in oo caadi aheeyn ka hor qaliinka, ka saarida hal iyo in ka badan limfa noodeska gacanta hoosteeda, waxay kuu sheegaysaa xaalada xaqiiqada ah ee limfa noodeska. Daraaso la sameeyey waxay sheegaysaa ka dib shan sano, haweynka laga saaray sentinel noodes waxay u badan tahay in ay noolaadaan yihiin kana madax-banaan yihiin kansarka sida haweynka laga saaray limfa noodes.